A Message from

# The Professional Development Team

Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES



## Gu' Wacan

Wargayskan sadexdii biloodba mar soo baxa ee Gobolka Washington ee Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska (DCYF) waxa loogu talagalay in lagu wargaliyo kuwa la shaqeeya Waaxda caruurta, dhalinyarada, iyo qoysaska Washington ee dhamaan haya hawsha wayn ee la xiriirta Horumarinta Xirfada.

## Wargeyskan...

- Tababarka Aasaasiga ah ee Daryeelka Caruurta (CCB) iyo Horumarinta Tayada Waxbarashada Hore (EQEL) Sanadka 1'aad ayaa hada laga heli karaa Websaydka Tababarka ee DCYF
- PACE ayaa hada la heli karaa si loo buuxiyo Shuruudaha Waxbarashada Shatiga!
- Waxyaabaha Cusub ee ku saabsan Labada Luqadood
- Boga Faahfaahinta Wararka Cusub ee Xarunta/Goobta MERIT
- Taageerooyinka Daryeelka Ka-warhelida Dhaawacyada
- More Money for More Local Food!
- PDs Dadaalada Hawlgalinta: Ku Lug yeelo
- Taxanaha Webinaarka Khadka Intarneedka ee Gu'ga
- Ma seegtay/Ma ku dhaafay Webinaarkii Labada Luuqadood ee bisha Abriil?
- Barnaamijka Tababarka iyo Tababarayaasha ee Gobolku Ansixiyay
- Taageerada Shaqaalaha ECE ee Waxbarashada

- Early Achievers Scholarship: Sheekooyinka Guusha
- Ka Qaybgalka Bulshada ee DCYF
- Cusboonaysiinta qabiil
- caLaamadayso boga intarneetka ee horumarinta xirfadeed
- Rukumo Fariimaha PD
- Fariin ka socota Xogyahaha DCYF
- Sidee Ayaynu Nahay?

---

## Tababarka Aasaasiga ah ee Daryeelka Caruurta (CCB) iyo Horumarinta Tayada Waxbarashada Hore (EQEL) Sanadka 1'aad ayaa hada laga heli karaa Websaydka Tababarka ee DCYF



Ardaydu hada waxay isu diiwan galin karaan Tababarka Aaasaasiga ah ee Daryeelka Caruurta iyo Horumarinta Tayada Waxbarashada Hore (EQEL) Websaydka Tababarka ee DCYF Sanadka 1'aad.  Koorsooyinkan ayay lacag la'aan ku heli karaan ka qaybgalaashu.

Halkan ka Gal koontadaada Websaydka DCYF ee Tababarka www.dcyftraining.com .

1. Dooro Xanaanada Caruurta ee Shatiga leh ka door ahaan.
2. Guji taabka Kooxaha/Cohorts ee ku yaala bidixda.
3. Hoos u dhaadhac oo kooxuhu/cohorts waxay ka muuqan doonaan dhinaca gacanta bidix Waxa aad dooran kartaa cohort oo isu diiwan gali tababarka aad rabto inaad dhamaysato.

Si aad u barato qaabka aad uga furan karto koonto Websaydka Tababarka ee DCYF, guji halkan .

---

# PACE ayaa hada la heli karaa si loo buuxiyo Shuruudaha Waxbarashada Shatiga!



War Farxad leh! PACE – Helitaanka Bixiyaha U Dhiganta Bulshada – waa halkan!  Fadhiyadayadii ugu horeeyay way bilaabmeen laakiin hadii wadadani ay ku xiisa galiso, waxa jiri doona fursado kale oo aad kusoo biiri karto mustaqbalka dhaw.

## Ku saabsan Pace

PACE waa jidka cusub ee bulshada-ku salaysan ee DCYF si loo dhamaystiro waxbarashadaada shuruudaha shatiga  ee loogu tala galay shahaadada bilawga ah. PACE ayaa loo tixgaliyaa inay tahay mid u dhiganta bulshada sababtoo ah marka aad dhamaysato waxaad yeelaan doontaa wax u dhigma si aad u buuxiso shuruudaha shatigaaga.

## Maxaa Ku jira PACE?

PACE waxaa ku jira fursadahan barasho ee soo socda:

- Tababarka Aasaasiga ah ee Daryeelka Caruurta.............30 saacadood hours
- Horumarinta Tayada Waxbarashada Hore.....20 saacadood
- ***CUSUB*** PACE Tabarada waxa ku jira :
    - Qaybta Daryeelka Hore iyo Waxbarashada (ECE)......20 saacadood
    - Taageerida Koriinka iyo fayoqabka Ilmaha..........20 saacadood
    - Barashada Shaqada (kalidaa)............30 saacadood

## PACE Ma kugu Haboon tahay?

- Waxaa laga yaabaa inaad dareento in aanad hubin inaad galayso koorsooyinka koleejka si aad u dhamaystirto shuruudahaaga waxbarasho.
- Waxaad doonaysaa inaad taageero gaar ah ka hesho tababare khibrad leh.
- Waxaad doonaysaa inaad isticmaasho barashada shaqada si aad u isticmaasho waxa aad baratay oo aad kala hadasho tababarahaaga natiijada.
- Waxa aad doonaysaa inaad doorato koox-koox adiga oo raacaya wakhti buuxinaya baahiyaaga.
- Waxaad rabtaa inaad ogaato inaad sii wadan karto koleejka hadii aad doorato oo aad hesho taageero inaad tan samayso PACE ka dib.

## Horey U qorshee.....

Hadii aanad horeba u lahayn, hubi inaad ku muujiso sida aad u rabto inaad waxbarashadaada ula kulanto adoo adeegsanaya koontadaada MERIT. Si aad wax badan uga barato kala-doorashooyinka kale

oo aad u aragto midka kugu habboon, booqo websaydka DCYF oo hoos ugu dhaadhac “Equivalents.” Sidoo kale waxaad macluumaad ku saabsan PACE ka heli kartaa halkan.

### Wali aan La hubin?

Kala xidhiidh MERITdcyf.merit@dcyf.wa.gov si aad wax badan uga ogaato PACE oo aad u go'aansato in ay si fiican kuugu qalanto adiga.


---

## Waxyaabaha Cusub ee ku saabsan Labada Luqadood

Bishii Maarso, Xubnaha Kooxda Latalinta Labada Luuqadood ee iyo la-hawlgalayaasha bulshada waxay gacan ka gaysteen u qaybinta sahanka bixiyeyaasha xanaanada cunuga si ay si wanagsan ugu fahmaan dadaalka labada luuqadood ee ka dhacaya gobolka oo dhan. Hoos waxaa ku yaala xogta jawaabaha sahanka:


### Jawaab bixiyaasha

Waxaanu helnay 125 jawaabood;  66 Isbaanish ah, 58 Ingiriis ah, iyo 1 Soomaali ah.  Jawaabaha ayaa ka yimid dhamaan gobolka oo dhan, xidiguhu waxay muujinayaan goobta jawaab-bixiyaasha (eeg khariidada):



## Luuqadaha

Bixiyeyaasha xanaanada caruurtu waxay xuseen luuqadaha ugu badan ee lagu matalo xanaanadooda caruurta ee aan ahayn luuqada Ingiriisiga. 1 oo ah kuwa ugu badan, 6 oo ah kuwa ugu yar.





| **Luuqadaha Ugu Badan ee ay ku Hadlaan Caruurtu** | **Luuqadaha Ugu Badan ee ay ku Hadlaan Macalimiintu** |
|---|---|
| 1. Isbaanish (104 jawaab bixiye)<br>2. Lahjada dadka Dhaladka ah (17 jawaab bixiye)<br>3. Chinese (9 jawaab bixiye)<br>4. Amharic (9 jawaab bixiye)<br>5. Somali (8 jawaab bixiye)<br>6. Arabic (8 jawaab bixiye) | 1. Spanish (101 jawaab bixiye)<br>2. Lahjada dadka Dhaladka ah (17 jawaab bixiye)<br>3. Amharic (7 jawaab bixiye)<br>4. Somali (6 jawaab bixiye)<br>5. Arabic (6 jawaab bixiye)<br>6. Chinese (3 jawaab bixiye) |

## Taageero dheeraad ah

Markii la waydiiyay noocyada taageerada bixiyayaasha xanaanada caruurtu ay rabaan inay helaan, jawaabaha waxaa ka mid ahaa:

1. Qalabka fasalka (110 jawaab bixiye)

2. Tababarka iyo Horumarinta Xirfadlaha (92 jawaab bixiye)
3. Kordhinta Mushaharka (86 jawaab bixiye)
4. Qorshaynta Waqtiga (77 jawaab bixiye)
5. Tababarka Diirada Lagu Saarayo Labada Luuqadood (73 jawaab bixiye)




Talaabooyinka Xiga

Bisha Maay, waxaanu la hadli doonaa bixiyayaal iyo qoysas badan sii loo soo gabagabeeyo shuruudaha qaabaynta labada luuqadood iyo halbeegyada.

Hadii uu ku dhaaftay/seegtay webinaarkii bishii Abriil ee Qaabaynta Labada Luuqadood, daawo muuqaalka laga duubay:Ingiriis | Isbaanish | Soamaali

La soco wararka cusub ee kusoo kordha Qaabaynta Labada Luuqadood!

---

# Boga Faahfaahinta ee Cusboonaysiinta Xarunta/Goobta ee MERIT

Waxa aanu cusboonaysiinanaa faahfaahinta bogga Xarunta/Barta ee MERIT oo loogu tala galay **Xarumaha Shatiga leh ee Xanaanada Caruurta** iyo **Guryaha Qoysaska**. Cusboonaysiintan waxa ku jira **"Doorka Xanaanooyinka Cusub ee Shatiga leh" tab** oo leh sifooyinka soo socda:

- Aragtida dhaashboodhka ee xubin kasta oo shaqaale ah oo ku shaqaynaya doorka waxbarashada hore ee shatiga leh. Dhaashboodhku waxa uu bixinayaa muuqaal sawir ah oo ku saabsan halka uu qofku ku sugan yahay buuxinaya shahaadooyinka shaqaalaha.
- Shaandhaynta u ogolaata loo shaqeeyaha inuu ku sifeeyo macluumaadka shaqaalaha doorar shaqo, shahaado gaar ah oo shaqaale ah, iyo heerka shahaadooyinka (sida, la kulmay, aan la kulmin, horumar).

Habkan cusub waxa la heli doonaa **Juun 2022** .

---

# Taageerooyinka Daryeelka Ka-warhelida Dhaawacyada



Iyadoo la meel mariyayFair Start for Kids Act (FSKA), DCYF waxay haysataa fursad sii loo kobciyo taageerooyinka daryeelka ka-warhelida dhaawacyada ee bixiyayaasha daryeelka caruurta Akhri macluumaadka ugu danbeeyay ee ku saabsan shaqadan muhiimka ah:

- **Hawlgelinta:** DCYF waxa ay fududeysay  kulamadii ugu horeeyay ee saamilayda dibada oo dhacay bishii Abriil si looga arinsado sida ugu fiican ee loo isticmaalo karo taageerooyinka FSKA ee ka-warhelida dhaawacyada si loogu adeego bixiyayaasha, caruurta, iyo qoysaska. Kooxdu waxa ay bilawday inay si cad u qeexdo soo jeedimaha ee sida loo hirgalinayo taageerooyinka ka-warhelida dhaawacyada, iyo DCYF waxa kale oo ay la shaqaynaysaa la-hawlgalayaasha si ay isugu yeedhaan bixiyayaasha iyo tababarayaasha si ay iyaguna sidoo kale u sameeyaan talo bixino.
- **Qiimaynta Tabobarka:** Diyaar garawga sii kordhaya ee taageerooyinka ka-warhelida dhaawacyada, DCYF waxay dib u eegaysaa tobobarka waxbarashada hore si ay u qiimeeyaan ilaa inta ay la jaanqaadayso Mabaadii'da Muhiimka ah ee Maamulka ee Adeega Caafimaadka Maskaxda iyo Xadgudubka Maandooriyaha ee Daryeelka Ka-warhelida Dhaawacyada. Dadaalkani wuxuu ka caawin doonaa DCYF inay aqoonsato meelaha lagu fidinayo waxbarashada ka warhelida dhaawacyada ee hada jira.
- **Iswaafajinta:** DCYF waxa ay qiimanaysaa halbeegyada waxbaqadka iyo siyaasadaha la xidhiidha Waxbarashada Caruurnimada Hore iyo Barnaamijka Taageerada (ECEAP), Early Achievers, iyo Head Start si loo aqoonsado meelaha la waafajinayo Mabaadii'da Muhiimka ah ee Daryeelka Ka-warhelida Dhaawacyada iyo dhaqamada la xiriira. Aqoonsiga halbeegyada waxqabad iyo siyaasadaha markii horeba la socday mabadii'da muhiimka ah iyo dhaqamada waxay awood u siin doonaan DCYF oo la kaashanaysa saamilayda bulshada inay dhisto taageerooyinka cusub ee ka-warhelida dhaawacyada ee aasaaska jira.

---

## More Money for More Local Food!



Arjiyada wareega xiga ee Deeqda Iibsiga Beerka ilaa Dugsiga waxaa la filanayaa inay dhawaan guranto!

Deeqda Iibisga Beerta ilaa Dugsiga waxaa laga heleyaa hawlwadeenada dugsiyada, xarumaha daryeelka ilmaha, iyo barnaamijka cuntada xagaaga oo laa iibsanayaa iyo in lagu isticmaalo cunto beerida Washington ee barnaamijyada nafaqada ilmaha. Kani waxaa weeye deeq loo tartamayo oo la gudayo.

Magaranaysid miyaa meesha aad ka bilaabayso? Kala Xidhiidh Annette Slonim, Khabiirka Deeqda Iibisga Beerta ilaa Dugsiga ee WSDA farmtoschool@agr.wa.gov ama 206-714-2757.

Wixii macluumaadka ugu danbeeyay ah iyo macluumaadka muhiimka ah, booqo websaytka Deeqda Iibsiga Beerta ilaa Dugsiga:

Deeqda Beerta ilaa Dugsiga

---

## PDs Dadaalada Hawlgalinta: Ku Lug yeelo



Kooxda PD waxaa ka go'an inay yeeshaan la shaqayn shacab iyo dadka dahana ka leh oo ay gacan ka gaystaan shaqadooda.

Wakhti xaadirkan, kooxdeenu waxay leedahay fursado badan oo ay kaga qayb geli karto wareega:

- PACE (Diinta Helitaanka U Dhiganta Bulshada/Provider Access to a Community Equivalent)
- Luuqado Badan/Labada Luuqado oo Waxbarashada Hore ah
- Barnaamijka Tobobarka Gobolku Ansixiyay

Booqo websaytka Dadaalka La Shaqaynta PD si aad macluumaad badan uga ogaato sida aad uga qayb geli karto aagaga shaqo ee kala duwan ee kooxda. Waxa aanu jeclaan lahayn in aan codkaaga maqalno!

Macluumaad Badan Ka Oggow & Ka Qayb Gal

---

## Taxanaha Webinaarka Khadka Intarneedka ee Gu'ga



Taxahani waxa uu diirada saarayaa helitaanka iyo khayraadka! Mawduucyada waxaa kamid ah dadaalka helitaanka luuqada, Laba Luuqadood ee waxbarashada hore, iyo macluumaadka ugu danbeeyay ee Daaqada Qorshaynta Mihnada Waxbarashada Hore.

Ha seegin!

---

## Maay: Helitaanka Luuqada




Nalaga soo qayb gal kulanka Isku Duwayaasha Helitaanka Luuqada Waaxda Waxbarashada Hore iyo si aad fursad ugu hesho in aad macluumaad ka hesho khidadaha lagu xoojinayo helitaanka luuqada ee xirfadlayaasha waxbarashada hore.

Mawduucyada soo socda ayaa si faahfaahsan looga hadli doonaa inta uu socdo webinarkani:

- Hordhaca isku duwayaasha helitaanka luuqada waaxda waxbarashada hore
- Wax ka ogaanshaha shaqada wakhtigan iyo yoolashada mustaqbalka ee lagaga jawaabayo baahiyaha helitaanka luuqada
- In laga wada hadlo tilmaamaha bixinta khidadaha lagu hormarinayo taageerada helitaanka luuqada

### Talaato, Maajo 17 | 6 galabnimo.

Halkan Iska Diiwaangelin

***Webinarka waxaa lagu qaban doonaa Ingiriisi, Isbaanish, iyo Somali.***

---

## Juun: Maxaa Ka Socda Daaqada Qorshaynta Mihnada?



Ma xasuusataa inaad hore u aragtay fariintan horaantii Maarso? Haye, natiijadii way soo dhacday oo waxaan doonayaa in aan idinla wadaago! Nagu soo biir si aad macluumaad badan uga ogaato  mashruuca Daaqada Qorshaynta Mihnada Waxbarashada Hore iyo talaabooyinka xiga. Waxa aanu si faahfaansan uga hadli doonaa mawduucyada soo socda:

- Dulmar dhakhso ah oo websaytka iyo ujeedadiisa ah
- Wadaagista natiijada daraasada xarunta isticmaalaha oo la sameeyay Maarso

- Talaabada xigta ee mashruucan

**Talaato, Juun 21 | 6 galabimo.**

Halkan Iska Diiwaangelin

## Ma seegtay/Ma ku dhaafay Webinaarkii Labada Luuqadood ee bisha Abriil?




Webinarkii Abriil waxa uu diirada saarayay Labada Luuqood (Dual Language, DL) ee DCYF ee Loogu talo geley barnaamijyada waxbarashada hore.

Maxay taasi macnaheedu tahay? DL-ka Loogu talo geley waxaa weeye barnaamijyo si gaar ah loo bixiyay oo lagu buuxinayo shuruudaha labada luuqadood.

Webinarka waxaa lagu heli doonaa Ingiriisi, Isbaanish iyo Somali oo waxaa laga heleyaa bogeena "Webinars" oo ku hoos jira "General Professional Developmen (Hormarka Xirfadeed ee Guud)."

Eeg Webinars-ka

## Barnaamijka Tababarayaasha iyo Tababarka ee Gobolku Ansixiyay



Ma waxa aad ku jirtaa tobobar mise waxa aad doonaysaa oo kaliya inaad macluumaad ka ogaato barnaamijka Tobobarka Gobolka Washington Ansixiyay? Nuqulka ugu danbeeya ee Wargeysa Korinta Shaqaalaha waxa uu isku diyaarinayaa Dadka La Tobobaray ee Gobolku Ansixiyay.

Liiska dhan ee Wargeyska Korinta Shaqaalaha waxaa laga helayaa websayska Wargeyska DCYF:

Joornaalada

## Taageerada Shaqaalaha ECE Ee Waxbarashada



DCYF way garanaysaa qiimaha waxbarashada iyo shaqooyinka loo igmanayo cida lala shaqeeyo ee bulshada waxbarashada sare si loo qaabeeyo oo loo buuxiyo barnaamijyo waxbarasho oo kala duwan si loogu taageero shaqaalaha waxbarashada hore. Si aad ula socoto barnaamijyadan iyo agabka kale ee waxbarashada, booqo:

Deeqaha waxbarasho, Dhiirigalinada, iyo Abaal marinta

---

## Early Achievers Scholarship: Sheekooyinka Guusha

## Sheekada Rita



*Waxa ka helay sanduuqa Early Achievers deeqda waxbarasho ee EA sadexdii sano ee u danbeesay. Tani waxay runtii iga caawisaa lacagta aan wax ku baranayo. Deeqda Early Achievers waxa ay wax wayn kusoo kordhisay arday badan oo ay ka caawisay inay gaadhaan himiladooda. Waxa aan aad ugu mahad celinayaa EA fursada deeqsinimada leh ee ay i siisay. Deeqda iyo fursadaha noocan ah ayaa u suurto geliyay ardayda sidayda oo kale ah inay awoodaan waxbarasho tayo leh inta lagu jiro wakhtiyadan dhaqaale ee cakiran. In la qaato taageeraran deeqda waxbarasho waxay si bilaa su'aal ah iigu riixday in aan heerka ugu wanaagsan ka gaadho waxbarashada iyo marka aan shaqada u baxo.*

*Laga bilaabo daraasad iyo khibrada waxaan ogaaday in barnaamijyada caruurnimada hore ee tayada sareeya ay bixiyaan deegaan amaan ah oo dhaqaalayn leh iyaga oo sidoo kale u ololeeya korniinka jidh, dad dhax gal, dareen iyo garaad ee caruurta yaryar. Tani waxay ka dhigan tahay in macalimiintu ay siiyaan wax is waydiin aan aad u adkayn ama aad u fududayn ardayda. Waxa aan abuuray deegaan aan ku buuxinayo shuruudahaas sida roog jilicsan, sawiro qoyska ah, caruusado midab leh, iyo wax kasta oo la jeclaysto. Waxbarashada Machadka Tiknoolajiyada ee Lake Washington ee Waxbarashada Carruurnimada Hore, waxaan ka bartay inaan abuuro naqshad fasal wax ku ool ah oo loo habeeyey hab la yaqaan oo dhiirigalinaysa waxbarashada caruurta iyo guriga sida deegaanka. Waxa aan sidoo kale sameeyay qiimeyn joogto ah oo la xidhiidhta xirfadaha caruurta, hirgelinta manhajka, la falgalka maalinlaha ah ee carruurta, dhisidda xiriirka qoysaska, iyo waxbarida gaarka ah ee ilmo kasta. Tani waxay dhamaan ku timid deeqda waxbarashada ee aan ka heley dhaqaalaha EA.*

*Waxaa si gaar ah iigu muhiim ah in aan helo deeqda waxbarasho maadaama oo aan qorshaynayo in aan helo digriigayga BAS oo ma aha suurtogal hadii aanan heli lahayn deeqdan.*

*Marka aan kordhiyo waxbarashadaydaba waxa aan dhigaa waxa uu si kasii badan wax ugu taraa caruurta, iyo qoysaskooda.*

*-Rita*

## Sheekada Samantha



*Deeqda Early Achievers ee aan heley si wayn ayay ii caawisay. Intii aan heley deeqdan, waxay ii caawisay si wayn macalin ahaan. Waxa aan u koray si wayn macalin ahaan markii aan qaatay koorashyada oo aqoon badan ayaan ka heley. Waxa aan keentay inay fasaladu u eekeedaan kuwa wax tar badan leh halkii ay noqon lahaayeen kuwa la soo qaabeeyay. Intaa wixii ka danbaysay fasaladaydu aad ayay u hormareen. Waxa aan si aad u dhaanta ula shaqayn karaa caruurta iyo si wax ku ool ah. Waxa aan aqaanaa wax ka badan in aan ka caawiyo hormarka iyo maalmo waxtar leh oo waxbarasho.*

*Waxa aan ka shaqeeyay xaruntayda 6 sano oo waxa aan jeclaan lahaa inaan hore u heli lahaa deeqdan waxbarasho. Waxa aan ku bartay fasalada kuuliyadayda ayaa iga caawiyay in aan si aad uga badan ka koro 6 dii sano ee xarunta ku sugtaa marka la eego barashada sida loola shaqeeyo caruurta. Ma jirto si kale oo aan ku qaadan lahaa oo fasaladan hadii ayna jirin deeqdan waxbarasho; dakhligaygu kuma filna. Waxa aan ku faraxsanahay in aan helo fursadan oo aan hormar ku sameeyo waxbarashadayda naftayda, caruurta ku jirtay fasalkayga, iyo xaruntayda. Waxa aan u arkaa inay aad muhiim u tahay in lacagta deeqdan waxbarasho ay sii jirto mustaqbalka maadaama aan uga mahadceliyay.*

*-Samantha*

---

## Nala Wadaag!




Miyaad heshey lacag Early Achievers ah oo ma doonaysaa inaad wadaagto sheekadaada? Waxa aad sheekadaada u dirtaa Khabiirka Waxbarashadeena ECE, Sharene Leek, si loogu daro wargeyska soo socda.

---

# Ka Qaybgalka Bulshada ee DCYF

Kooxda La Shaqaynta Bulshada DCYF waxay samaysaa kormeer iyo taageero la shaqaynta dadka danaha ka leh ee banaanka iyo gudiyada la talinta si loo xaqiijiyo inuu jiro xidhiidh joogto ah oo wax ku ool ah oo u dhaxeeya dadka iyo hay'ada.

### Ka Qayb Gal!

DCYF waxay haystaa fursado badan oo lagu xaqiijinayo in codkaaga la maqlo. Waxaa kamid ah:

- Gudida Latalinta Waxbarashada Hore
- Gudi Hoosaadka Taageero Bixinta
- Kooxda Latalinta Waalidka
- Iyo wax kale oo dheeraad!

Liiska dhamaystiran ee gudiyada latalinta iyo golayaasha ama sida aad uga qayb geli karto, booqowebsaytka La Shaqaynta Bulshada DCYF.

## Cusboonaysiinta qabiil




Ma ogeyd in DCYF ay leedahay Xafiiska Xiriirka Qabiil ahaaneed?

- Fariin Ka Socota Xafiiska Xidhiidhka Qabaa'ilka: Wegeyska Abriil 27, 2022
- Fariin Ka Socota Xafiiska Xidhiidhka Qabaa'ilka: Wegeyska Abriil
- Fariin Ka Socota Xafiiska Xidhiidhka Qabaa'ilka: Wegeyska Maarso

DCYF waxay bixisaa rukumada mowduucyo kala duwan ah. Hubi liiska buuxa ee mawduucyada rukumashada.

## caLaamadayso boga intarneetka ee horumarinta xirfadeed

Yaanu ku dhaafin macluumaadka ugu danbeeya ee ku saabsan tobobarka iyo PD. Calaamadee Bogga Websaytka PD!

Calaamadee Bogga Websaytka PD

## Rukumo fariimaha PD

*Kordhinta Shaqaalaha* waa kheyraad loogu talagalay dhammaan shaqsiyaadka ku jira ganacsiga gaarsiinta taakuleyn waxbarasho xirfadeed shaqaalaha  wxbarashada hore.

*Wargeysa PD* waxaa loogu telo geley in uu la socodsiiyo bulshada waxbarashada hore ee Washington dhamaan shaqooyinka Hormarka Xirfadlaha ah.

Rukumo

*Liiska fariimaha oo dhameystiran waxaa laga heli karaa boggeena Fariimaha iyo bogga Websayt.*

## Fariin ka socota Xogyahaha DCYF



Xog Hayaha DCYF Ross Hunter waxay la wadaagi doontaa fariimaha bishii bixiyayaasha ee macluumaadka ugu danbeeya iyo wararka ku saabsan shaqada hay'ada. Waxaad akhridaa fariintiisa ugu danbaysa oo waxaad riixdaa halkan si aad ula socoto .

- Wargeyska Maay
- Wargeyska Abriil
- Wargeyska Maarso

Hadii aad heyso wax suaalo ah ama faalooyin, fadlan la xidhiidh DCYF Xafiiska Xidhiidhada.

---

## Sidee Ayaynu Nahay?



Fadlan nala soo socodsii sida aan sameyneyno samaynta degdeg ah sahanka saddex-su'aal ah.

Hadii aad ka qabto su'aalo ama aad nala socodsiinayo mawduuc waxa aad la xidhidhaa Marlene White.